



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

ANSIXINTA XUBIN GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE
DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA

Muqdisho, 14 Nofeembar 2015

A handwritten signature in black ink, appearing to be the name of the speaker or a representative of the House of Representatives.

GOLAHA SHACABKA:

Markuu Arkey: Soojeedinta R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Lam. XRW/000314/06/2015 kuna taariikhsan 28/06/2015 oo Golaha soo gaartay 29/06/2016 diiwaangelin Lam: 669 kuna saabsan codsi Ansixinta Xubin Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

Markuu Arkey: Sharciga Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka Lam. 119 ee 7da Agoosto 2013;

Markuu Ka baaraandegay: Taariikh nololeedka xubinta magacaabistiisa loo soojeediyey in uu ka mid noqdo Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka si uu u buuxiyo xubinnimada ay banaysay Marwo Caasha Geelle Diiriye oo iskeed uga istaqaalootay;

Iyada oo ay goob joog yihiin: 162 Xildhibaan oo codeenayey:

Qodobka 1aad:

wuxuu wadar-oggol ku ansixiyey in M.ne Maxamed Daahir Afrax noqdo xubin ka tirsan Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka uuna buuxiyo halkii ay banaysay Marwo Caasha Geelle Diiriye.

Qodobka 2aad:

Waxaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga codsanayaa in uu go'aanka Golaha ku meelmariso Xeer Madaxweyne kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida ku-meel-garka loo ansixiyey.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

